



Hargabka iyo sua'aalaha inta badan lais waydiiyo COVID-19 (FAQs)

(10-06-2021)

S: Siduu ahaa xilliga hargabka sanadkii hore?

Xilligii 2020-21 wuxuu ahaa sanad aan hore loo arag, oo rekoodhkiisu hooseeyo ee kiisaska hargabka. Kumanaan dad ayaa laga baaray hargabka, laakiin in yar oo baaritaanada ah ayaa ku soo laabatay in ay fayraska qabaan. Oregon waxay aragtay isbitaal seexin aad u yar ee hargabka xilli kasta— badanaa wuxuu arkaa boqolaal. OHA “ [Qaniinyada Hargabka](#) ” (<https://www.oregon.gov/oha/ph/diseasesconditions/communicabledisease/diseasesurveillancedata/influenza/pages/surveil.aspx>) waxay bixisaa cusbooneysiinta toddobaadlaha ah ee kiisaska hargabka ee Orego.

Q: Waa maxay sababta bixiyeyaasha daryeelka caafimaadku ay aad ugu welwelsan yihiin xilliga hargabka ee sanadkan inta lagu jiro cudurka faafa ee COVID-19?

Marka hore dadka qaar ayaa laga yaabaa inay si qalad u rumeystaan in haddii laga tallaalo COVID-19, ay sidoo kale ka badbaadaan hargabka oo aysan u baahnayn tallaalka hargabka. Tallaalka COVID-19 waxtar uma laha hargabka, sidoo kale tallaalka hargabku waxtar uma laha COVID-19.

Intaa waxaa dheer, iyadoo musiibada sanadkii hore ku qasabtay ardayda Oregon inay ka xaadiraan dugsiga iyagoo u maraya waxbarashada masaafada, ama isku-darka barashada masaafada iyo waxbarida qof ahaanta xadidan, dugsiyadu waxay ku noqdeen waxbarida buuxda ee qof ahaanta ah sannadkan (shaqaalaha dugsiga iyo ardayda ayaa weli loo baahan yahay inay gudaha ku sii xertaan maaskaro). Kaxeeyaha ugu wayn ee gudbinta hargabka inta lagu jiro xilliga hargabka waa carruurta da'da dugsiga.

Ugu dambayntii, sababtoo ah carruurta badankoodu waxay ka xaadirayeen dugsiga iyagoo u maraaya wax barashada masaafada ee guriga, ma aysan la kulmin kala duwanaansho badan oo hargabka ah oo inta badan ku wareegsada xilli kasta oo hargabka ah laakiin aan ka dhigeynin kuwo xanuunsada, taas oo ka dhigi karta inay u nuglaadaan jirro aad u daran ee ka yimaada hargabka.

S: Miyaad fileysaa inay jiri doonto hargab badan sannadkan sababta oo ah carruurta waxay ku noqdeen barashada qof ahaan?

Waxaa jiri karta in dillaac hargabka caadiga ah uu ka dhaco dugsiyada sannadkan. Laakiin farqiga weyn ee u dhexeeya hargabka iyo COVID-19 ayaa ah hargabka, laga yaabaa inaad ahayn mid caabuqeysan ilaa aad ka qabto astaamo, halka dad badan oo qaba COVID-19 aysan lahayn astaamo.

Waagii hore, qoysaska qaar ayaa laga yaaba inay u oggolaadeen carruurtooda inay digtaan dugsi leh astaamo hargab oo yar, laakiin walaac ku saabsan COVID-19, kaas oo la wadaaga qaar ka mid ah astaamaha qandhada—hargabka, qufac, cuno xanuun— ayaa taas ka dhigeysa mid aad u adag ayadoo ugu wacan tahay hab-maamuusyada badbaadada COVID-19 ee dugsiyadu meel dhigeen. Intaa waxaa dheer, shaqaalaha dugsiya iyo ardayda waxaa laga rabaa inay maaskaro gudaha ku xirtaan mar walba, taas oo xaddideysa gudbinta hargabka.

S: Ma qaadan kartaa tallaalka hargabka islamarkaasna sida tallaalka COVID-19 ahaan? Miyaan culeys badan saarayaa habka difaaca jirkayga haddii aan sameeyo?

Waad qaadan kartaa tallaalka hargabka islamarkaasna sida tallaalka COVID-19 ahaan. Ama, haddii aad dhawaan qaadatay tallaalka COVID-19 usbuucii hore, ma jirto sabab aadan u qaadan karin tallaalka hargabka toddobaadkan. Taasi kuma jirto wax xaddidaad ah.

Waxaa muhiim ah in la xusuusto in carruurta si joogto ah u helaan tallaalka cudurro badan oo ka hortagi kara tallaalka, oo ay ku jiraan gawracatada, teetanada, xiiqdheerta, dabaysha, busbuska, jadeecada, qaamo-qashiirta, rubella(jadeeco) iyo cagaarshow. Tallaalka badan, ee hal mar la siiyay, ma caburinayaan nidaamyadooda difaaca ama kama dhigayaan kuwo aad ugu nugul cudurka. Aad bay uga dhib yartahay nidaamka difaacaaga si aad u qaadato tallaalka marka loo eego si aad u qaado jirrada. Isla midaas ayaa la mid ah COVID-19 iyo hargabka; Waxaa aad u fiican inaad qaadato tallaalka halkii aad ka qaadi lahayd cudurada.

S: Maxaan u baahanahay inaan ka ogaado COVID-19 iyo astaamaha ifilada?

Ilaa aad ka ogaato inaad qabtid hargab ama COVID-19, waxaa muhiim ah inaad si isku mid ah uga jawaabto calaamadaha labada caabuq ay wadaagaan. Haddii aad dareento qandho, qufac iyo cuno xanuun, waa inaad guriga ka joogtaa shaqada ama dugsiya, xirataa maaskaro, masaafo ka fogaataa dadka kale oo aad isa soo baartaa, oo aad la xiriirtaa bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii calaamadahaagu ka sii daraan. Labada fayras waxay wadaagaan astaamaha iyo sidoo kale tillaabooyinka looga hortago ku faafitaankooda dadka kale.

S: Haduu kugu dhaco hargabka, aad miyaad ugu nugushahay COVID-19?

Maya. Waxaa waaye fayrasyo gooni ah, oo inta ay wadaagaan astaamaha qaarkood - qandho, qufac, cuno -xanuun - mid yeelashada ma kaa dhigayso mid u nugul inaad qaaddo kan kale. Sidoo kale way sahlan tahay inaad qaado COVID-19 haddii aad hargab qabto iyo haddii kaleba.

S: Suurtagal ma tahay in labada fayras isku mar la wada qaado, oo miyay taasi noqon kartaa dhacdo naxdin leh?

Sanadkii 2020, markii COVID-19 uu bilaabtay inuu faafo, Oregon waxay qabeen qaar ka mid ah kiisaska hargabka goor dambe iyo isbitaal dhigis xitaa kadib markii cudurka bilaawday. Labadooduba isku mar way wada wareegi karaan, waxaana jiray kiisas dad ah oo laga helay labaduba. Si kastaba ha noqotee, ma jiraan xog badan oo laga heli karo saamaynta caafimaad ee “wada-caabuqeyn” leh hargabka iyo COVID-19. Si aad tan uga hortagto, sharadkaaga ugu fiican ayaa ah inaad iska tallaasho labada fayras.

S: Maxaan ka maqleynaa ee ku saabsan hargabka dhinaca kale ee aduunka? Siduu u ekaa xiligooda hargabka?

Wax weyn oo la yaab leh kama jiraan oo ku saabsan xogta ka imaanaysa cirifka koonfureed. Ma jiraan hargab cusub oo soo if-baxaya, waxayna ahayd xilli hargab fudud ka jira meelaha sida New Zealand iyo Australia. Darnaanshaha xilli kasta oo hargabku jira waxay ku xiran tahay inta qof ee qaadanaysa tallaalka hargabka, haddii dadku guryahooda joogaan marka ay jiran yihiin, iyo inta dadka isticmaalayaan daboolaha wejiga marka ay bannaanka joogaan.

S: Sanadkii hore, sababtoo ah ma aanan haysan tallaalka COVID-19, waxaa jiray dadaal weyn oo lagu doonayay in lagu helo tallaalka hargabka. Hadda oo aan labaduba leenahay, weli ma muhiim baa in laiska talaalo hargabka?

Haa. Dhab ahaantii waa muhiim in la helo tallaalka hargabka sannadkan. Ma doonaysid inaad iska ilaaliso qaadista COVID-19 adigoo is tallaalaaya, kaliya inaad kugu dhaco hargabka sababtoo ah ma qaadan tallaalka hargabka.

Hargabku wuxuu buuxin karaa isbitaallada sida COVID-19 uu awoodo. Inta lagu jiro xilliyada hargabka badan, waxaa jira kiisas badan oo ku xeeran gobolka, iyo xitaa qaar dhimashada, gaar ahaan carruurta yaryar iyo dadka waaweyn. Hargabkuna wuxuu saamayn xun ku yeelan karaa shacbiyad aan aad loo tallaalin.

S: Waa maxay tallada caadiga ah ee loogu talagalay cidda qaadanaysa tallaalka hargabka?

Qof kasta oo jira 6 bilood iyo ka weyn waa inuu qaataa tallaalka hargabka, gaar ahaan kuwa aadka u yar, aadka u weyn, ama qaba xaalado kale oo dabadheeraatay, sida wadne -xanuun ama macaanka. Intaa waxaa dheer, haweenka uurka leh waa in la tallaalaa maadaama carruurta ka yar 6 bilood aysan qaadan karin tallaalka hargabka. Sidoo kale, marka haweeneyda uurka leh ay qaadatao tallaalka, waxay ka dhigan tahay inaysan kaliya ka fogaan dhibaatooyinka halista ah xiliga uurka, laakiin waxay sidoo kale u gudbisaa ka unugyada difaaca jirka qaaliga ah ee hargabka ilmaheeda aan dhalan. Sannadkaan, CDC waxay leedahay aad ayey muhiim ugu tahay haweenka uurka leh inay qaataan dhamaan tallaalka hargabka iyo COVID-19 si ay u difaacaan naftooda iyo ilmahooda aan dhalan.

S: Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hargabka iyo tallaalka?

Booqo [flu.oregon.gov](https://www.oregon.gov/oha/ph/preventionwellness/flu-prevention/Pages/index.aspx)
(<https://www.oregon.gov/oha/ph/preventionwellness/flu-prevention/Pages/index.aspx>)

wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan ka hortagida hargabka iyo qaadashada tallaalka hargabka.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriir Xarunta Warbixinta Caafimaadka ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhs.ohio.gov.